Academy for Peace and Development
Akaademiga Nabadda iyo Horumarka

DIRAASAD KOOBAN
OO KU
SAABSAN
WAXBARASHADA MADANIGA AH
(CIVIC EDUCATION)

Warbixin ku salaysan Aqoon-is-weysdaarsi
August 2007
Hargaysa, Somaliland

Academy for Peace and Development - Akaademiga Nabadda iyo Horumarka
Hargeysa Somaliland Telephone: +252-2-520304 email@apd-somaliland.org http://www.apd-somaliland.org

Hordhac:

Somaliland waxa ka qabsoomay afar cod-bixinood laga bilaabo tii aftida Distoorka ilaa iyo tii Golaha Wakiillada oo lagu hirgeliyay habka Dimuqradiyadda Axsaabta faraha badan. Markaa si ay dimuqraadiyadda curdinka ahi u taabbo-gasho waxa lagama- marmaan ah jiritaanka dhaqan siyaasadeed (political culture) oo la jaan-qaadi kara dimuqraadiyadda aynu qaadannay. Siyaabaha Dimuqraadiyadaha cusub ay ku hanan karaan waa dhaqanka siyaasadeed (political culture) oo suurto-gelin kara dimuqraadiyadda wax-ku-ool ah, taas oo ay ka mid tahay waxbarashada madaniga ahi (Civic education).

Somaliland xilliga doorashooyinka ma aha e' ma jirto (civic education) waxbarasho madaniya oo joogto ah oo baahsani. Sidaa awgeed Akaademiga Nabadda iyo Horumarka waxay qaban-qaabisay aqoon-is-weydaarsi lagu lafa-guray sababaha keenay in aanay jirin waxbarasdho madani ah (civic eduation) oo joogtaysan oo baahsani iyo sidii loo meel dhigi lahaa kaalinta ay kala leeyihiin qaybaha kala duwan ee ay arrintani khusayso sida: Dawladda (Fulinta iyo Sharci dejinta), Komishanka Doorashayoonka, Axsaabta Qaranka, Warbaahinta, Ururruda Bulshada Rayadka ah iyo Dadweynaha.

Boobe Yuusuf Duaaleh (isu-duwaha Barnaamijyadda APD)

Aqoon-is-weydaarsigaa oo soconayey saddex maalmood, waxa ka soo qayb-galay dad ka kala socda Dawladda (Fulinta iyo Sharci dejinta), Komishanka Doorashayoonka, Axsaabta Qaranka, Warbaahinta, Ururruda Bulshada Rayadka ah, Dadweynha, wax-garad, iyo Ardayda Jaamacadaha. Dhowr maalmood aqoon-is-weydaarsi ka hor waxaa ka-qayb-galayaasho loo sii qaybiyey ajendaha saddexda cisho ee uu soconayo Aqoon-is-waydaarsigu iyo qoraal loogu tala-galay in uu doodda hoggaamiyo (eeg. Lifaaqa 1aad & 2aad). Waxaana aqoon-is-weydaarsiga furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada ee Somaliland, Mudane Cali Odawaa.

Ujeeddooyinka Aqoon-is-weydaarsiga

- In lagu lafa-guro sababaha keenay in aanay jirin waxbarasdho madani ah (civic eduation) oo joogtaysan oo baahsani,
- In laga doodo sidii guud ahaan kor loogu qaadi lahaa Waxbarashada Madaniga ah (civic education),
- In la meel-dhigo doorarka kala duwan ee ay qaybaha mujtamacu arrintan ku kala leeyihiin,

Qoraalkani ama warbixintani waxay xambaarsan tahay nuxurka dooddi ka dhacday aqoon-is-weysdaarsigaa ku saabsanaa Waxbarashada madaniga ah, waxaananu uga gol leenahay in aanu la wadaagno wixii ka soo baxay aqoon-is-weysdaarsiga ka-qayb-galayaashii iyo wixii kaloo danaynaya arrinkan. Waxaanu kale oo doonaynaa in ay warbixintani u noqoto gogoldhig wixii doonaya in ay wax ka qabtaan arrinka (waxbarashada madaniga ah), annagoo ka shidaal qaadanayna hadalladii qaar ka

mid ah ka-qayb-galayaasho oo lahaa: "*Wax hore ummaddan ugu sameeysanaa ooe ku saabsan waxbarasho madaniya ma jaro e', waxaa maanta aad bilowdeen ha inoo noqdo gogoldhig."*

Waxbarashada Madaniga ah (civic education):

Intaan ka-qayb-galayaashu ka doodin jiritaanka waxbarashada madaniga ah (civic education) oo joogto ah oo baahsan, waxaa dooddii ka dhalatay erayga "waxbarashada madaniga ah" iyo machnaha uu xambaarsan yahay. Qayb ka mid ah ka-qayb-galayaasha waxay la ahayd in ay ku habboon tahay "waxbarashada deegaanka" halka "waxbarashada madaniga ah". Waxayna sabab uga dhigeen in ay weedha "waxbarashada madaniga ah" ka mid tahay kelmedda 'madaniga' ah, oo ah kelmed Af-carabiya ah oo u ekaanaysaa in ay ku kooban tahay magaalo. Wax-barashadda aynu u jeednaana intaa waa ay ka macno ballaadhan tahay oo waxa soo hoos-galaya barashadda Diinteenna, dhaqanka, hidaha, iyo qaab-dhismeedka, khayraadka/nicmoolayda iyo cimilada daldkeena. Markaa waxay soo jeediyeen adeegsiga "waxbaraashad degaanka".

Laakiin se, ka qayb-galayaasha intooda badni oo ay ku jiraan dadk ku xeel dheer arrimaha sugaanta iyo erey-bixinta[1], waxay door bidayeen "waxbarashadda madinaga ah." Marka hore iyagoo qiray in ay Waxbarashada madanigu ballaadhan tahay haddana ay u badan tahay dhinaca siyaasiga ah, oo ah baridda muwaaddinka xilka ama waajibka ka saaran waddankiisa iyo sidii qofka loo dareen siin lahaa ama uu u yeelan lahaa dereenkaas. Waa sidii loo heli lahaa muwaaddin madani ah (miyi iyo magaalaba) oo la jaan-qaadi kara nidaamka Siyaasadeed ee aynu qaadannay iyo noolasha jirta maanta oo ku salaysan magaalada. Markaa waxay taageereen isticmaalka weedha "Waxbarashada Madaniga ah".

Waxbarasho madani ah oo joogtaysan oo baahsan:

Arrinta ah in ay Somaliland ka jirto waxbarashada madani ah ama in aanay ka jirn, aragtidaa ka-qayb-galayaashu waa ay ku kala duwanaayeen; waxaana ka mid ahaa aragtiyaha kala duwan qaar amminsanaa in ay jrto waxabarasho madaniya oo yidhi: "*Waxbarasho madaniya waynu soo lahaan jirney, waligeenna waa aynu lahayn immikana waa aynu leenahay."* Qaarna waxay lahayeen waxbarashada noocaasi waa mid teel-teel ah ama qubane ah oo laga dhex heli karo casharrada laga bixiyo dugsiyada waxbarashada, barnaamiyada iyo qoraalada dadka ee baraarujinayaa ama ay ku wacyi-gelinayaan warbaahinta iyo Ururrada Bulshada Rayidka ah. Markaa lama odhan karo ma jirto ee is-weydiintu waxay tahay maxaa gaabiska ka dhigay waxbarashada madaniga?

Qaar kale waxay aamminsanaayeen waxbarashada madaniga ah ee jirta ma' aha mid cilmiyasan oo haw-gal (practical) oo ka tarjumaysa baahida waddanka. Ka-qayb-galayaasha aragtidaa qabay waxay lahayeen: *"waxa la doonayaa mid la socota koritaanka maskaxda ardayga, waa in ay tahay mid inta dadwaynaha meel la isugu yeedho oo halkaa lagu wacyi-geliyo oo lagu baro muwaaddinka waajibaadkiisa iyo xuquuqdiisa iyo habka loo codaynayo maalmaha doorashooyinka. Waxbarashada madaniga ah ee loo dhigo dugsuyada hadii ay tahay mid wax-ku-ool ah waxaa dhici lahayd in aliflaha ama hor-joogaha fasalka ay ardaydu dhexdooda iska doortaan halka uu macalinku u caleema-saarayo ardayda".*

Waxay aragtida inteeda badani isugu soo ururaysay in waxbarasho madaniya oo joogto ah oo baahsani oo muwaaddinka dareensiinaysa xilka ka saaran waddankiisa ama mid ka hadlaysa wax

[1] Sidaa Boobe Yuusuf Ducaaleh, Rashiid Cabdilaahi (Gadhwayne)

walba oo nolosha maanta taabanaysa in ay meesha ka maqan tahay, laakiin se ay jirto mid kale oo aan ahayn noocaas aynu tilmaannay. Mid ka mid ahaa dadlka aragtidda qabay ayaa sidan yidhi:

"*Waxbarasho madaniya ah oo qofka xil saarta oo giddigeen ku wada shaqayno ayaa jirta laakiin waa mid aan waddanka la xidhiidhin. Waa mid aan qofka ku beerin dareenka ah in xil ka saaran yahay dalka oo dhan, laakiin se ku beerta in xil ka saaran yahay qabiilkiisa iyo qolodiisa oo keliya*."

Sababaha kala duwan oo faraha badan ee ay ka-qaybgalayaashu u aanaynayeen maqnaanshaha waxbarasho madaniya oo joogto ah oo baahsan, waxaana ugu muhiimsanaa:-

- Waxa meesha ka maqan xirfaddii, aqoontii, habkii iyo hoggaankii lagu dejinayay, wixii hagii lahaa wax-barashadda madanig ah,
- Sii jiritaanka waayihii laga dhaxlay dagaaladii iyo burburkii, iyo maamulkii raagay ee kali-taliska ahaa oo yareysanayay fahamka iyo ahamiyada ay leedahay wax-barashada madanig ahi,
- Dhaqaale-xumida, aqoon-la'aanta waddanka ka jirta iyo la'aanta ama gaabiska kaabayaashii iyo hay'adahii loo adeegsan lahaa, waxay adkaysay helitaan waxbarasho madaniya oo joogto ah oo baahsan,
- Arrinkaas waxbarasho madaniya oo joogto ah oo baahsani waa arrin la wada gabay, hadday tahay dawladda, Axsaabta, Ururrada bulshadda, warbaahinta iyo dadweynahaba,

Qoyska, dawladda ama Ururrada bulshada ayay u arkayeen qayb ka mid ah ka-qayb-galayaashu in ay tahaty cidda kaalinta kowaad leh sidii loo hirgelin lahaa waxbarasho madaniya oo joogto ah oo baahsan. Hase yeeshee intooda badani waxay isku raaceen in ay tahay arrin dhammaanteen xil inaga wada saran yahay, laakiinse waxa loo baahan yahay wixii isku-keen xidhi lahaa.

Dhinaca awoodaha ama fursadaha jira ee dhiirri-gelin kara hirgelinta waxbarashadan madaniga ah, waxaa la tilmaamay arrimahan soo socda:

- Dimuqraadiyadda waddanka ka hirgashay,
- Nabadda waddanka ka jirta,
- Jiritaan Hay'ado (dawliya ama aan dawli ahayn) in kastaba awooddoodu ha ahaato e',

Kaalinta Dawladda

Ka-qaybgalayaashu dhammaantood waxay isku raaceen in kaalinta dawladda (heer Dhexe iyo heer Hooseba) hadday yihiin fulinta ama sharci-dejinta in ay tahay mid aad iyo aad muhiim u ah oo ay tahay in ay hagto waxbarashada madaniga ah. Waxayna la ahayd ka-qaybgalayaasha in qaybaha kala duwan ee dawladdu iska kaashadaan sidii ay u jeexi lahaayeen siyaasad cad oo looga gol leeyahay xoojinta kaalinta dawladda ee ku waajahan waxabarashada madaniga ah iyo hirgelinta waxbarasho madaniya oo joogto ah oo baahsan. Waxaanay tahay in ay Fulintu (xukuumadda) hirgeliso siyaasaddaa iyada oo samaynaysa barnamijyo iyo hay'adihii meel-marin lahaa hawsha waxbarashada madaniya ah. Isla markaana sharci dejintu ku ilaaliso ama hubiso in ay Fulintu (Xukuumaddu) meel marisay hawsha loo igmaday.

Waxa kale oo ay ka-qayb-galayaashu aanay isku khilaafin in ay kaalinta qaybaha kala duwan ee dawladda meesha ka maqan tahay oo aanay sameynba siyaasaddii looga baahnaa. "*Ma jirto*

siyaasad cad oo ku saabsan waxbarashada madaniga ah ku wajahan inta bulshada wax dooran karta ama la dooranayo, oo mustaqbalka dalka gacanta ku haysa, sidii hab-dhaqankooda loo toosin lahaa lana gelin lahaa dareenka in uu xil ka saran yahay waddankiisa iyo in uu daneeyo maslaxadda guud." Sidaa waxa yidhi mid ka mid ah ka-qayb-galayaasha.

Ka-qayb-galayaasha qarkood lama yaabbanayn la'aanta siyaasad ama wax-qabad qaran oo ku saabsan wax-barashada madanig ah. Taasna waxaa laga dareemayey hadalladii dooddan: "*Dawlad iyo dadba ma dareensanin in baahi loo qabo arinkaas, sababtaas ayaanay u jirin ee wax kale ma aha. Markaa aad dareentid in ay wax kaa maqan yihiin ayaad doontaa. Waxaan jirin rabitaan dawladeed oo arrinkaasu weli kama soo go'in xagga dawladda*."

Waxa kale oo sabab laga dhigay Isu-dheellitir la'aanta awoodaha seddexda waaxood ee dawladda oo wiiqay wada shaqayntooda iyo sidii ay isaga kaashan lahaayeen maareynta dhibaatooyinka waddanka iyo sidii midba mid kale u ilaalin lahaa oo u hubin lahaa in uu hawshii gutay.

Kaalinta Komishanka Dorashooyinka

Ka-qayb-galayaashu waxay isku raaceen haddii uu sharci u idmayo[2] iyo haddi kaleba in ay waxbarashada madanigu ka mid tahay hawlaa ugu waawayn ee ay qabtaan Komishanku xilliyada doorashada; waxayna qireen in uu Komishanku, xilligii doorashooyinka sameeyeen wacy-gelin iyo wax-barid cod-bixiyayaasha wanaagsan marka loo eego awoodda iyo agabka ay haysteen.

Sidoo kale waxay la ahayd in Komishanku noqdo mid joogteeya oo ballaadhiya hawlaha waxbarasha madaniga ah oo aanu isku koobin xilliga doorashooyinka iyo wecyi-gelin ku saabsan hab-socodka doorashada oo keliya. Laakiin nasiib-darro xilliyada aanay jirin doorashooyin, hawlaha Komishanka waxaa ku yimaadda hoos-u-dhac weyn, taasina macnaheedu waxa weeye in aanu Komishanku ahayn mid fulin kara waxbarashao madaniya oo joogto ah oo baahsan
Ka dib waxaa la tilmaamay duruufaha u saamixi waayey Komishanka in ay sameeyaan wayci-gelin joogta ah oo ballaadhan waxaana ka mid ahaa durufaha la tilmaamay:

- La'aanta misaaniyad joogta ah iyo awoodihii kale oo loogu talo-galay hirgelinta wayci-gelin joogta ah, ballaadhan oo baahsan,
- Maqnaashaha warbaahin gaadhta waddanka oo dhan (miyi iyo magaalaba) gaar ahaan idaacad,
- Awood-darrida Ururrada bulshadda waddanka ka jira, ee dhinaca waxbarashada madaniga oo ka mid ah kaabayaasha ay Komishannadu adeegsadaan markaa ay sameeynayaan waxbarasho madaniya,

Kaalinta Axsaabta

Dareenka guud ee ay ka-qayb-galayaashu ka bixiyeen kaalinta Axsaabta ee ku waajahan dhinaca waxbarashada madaniga ah waxay ku kooban tahay hadalkan oo u yidhi mid ka mid ah ka-qayb-galayaashu:

[2] Komishanka Somaliland, sida Komishannada waddammo Afrikaana ah, waxbarashada madaniga ah iyo wacyi-gelinta cod-bixiyayaasha ka mid ah hawlaha sharciyan loo idmaday, inkastoo ay ka mid tahay hawlaha ugu waa weyn ay qabtaan.

"*Axsaabtu waa cidda koowaad oo kaalintan si qurux badan u gudan lahayd, waxyaalaha ugu muhiimsan oo ay tahay in uu xisbugu qabto oo laf dhabarta u ah waa mucalinnimo oo dadka macallimiin ugu ugu noqdaan wax fara badan sida mas'uuliyadda, is-kaashigaa, anshaxa wanaagsan, ammaanada, hadalka iyo ficil is-waafaqsan, wax-qabadka iyo shaqo-jacaylka iyo wixii la qabanayo oo si fiican loo fuliyo. Markaa wuxuu u noqon karaa dadka tusaale ama ku- dayasho fiican*."

Intaa waxay raaciyeen in ay Axsaabtu ku lahaato xarumo xaafadaha dhexdooda oo ay ku wacyi-geliyaan dadweynaha. Waxaa kale oo la isla la qaatay in aanay Axsaabtu ahayn mid gudatay kaalinta macalinnimada ee looga baahnaa, waxay noqdeen kuwo aan cabbirin danta guud ee cabbira tan qabiilka iyo mid shaksi.

Duruufaha u saamixi waayey Axsaabta in ay kaalintoodaas kor lagu xusay gutaan waxa la isugu soo ururin karaa hal cudur oo ah Axsaabta waxaa ka maqan wax la yiraado **"xisbinimo".** Laakin se, ka-qayb galayaashu waxay ku gala duwanaayeen arrimaha sababay in ay Axsaabtu lumiso "xisbinnimadooda". Sababaha la sheegay waxaa ka mid ahaa:

- Qab-dismeedka Axsaabta curdinka ah ay noqday mid u nugul qaab-dismeedka soo jireenka ahaa ee Bulshada Somaliland ee ku salaysan Qabyaaladda, sidaa awgeedna ay Axsaabtu noqotay mid u adeegta qabiilka,
- Dhaqaale-darro, waayo-aragnimo-la'aan iyo dadweynaha oo aan aqoon u lahayn xisbinnimada oo halkii ay iyagu xisbiga wax ugu deeqi lahaayeen, iyagu xisbiga dhaqaale ka filanaya taasina markeeda adkaysay in ay Axsaabtu korto oo ay ka marmaan qabiilka,
- Maqnaashaha mabaadiida guud oo isku xidh xisbiga dhexdiisa, dimiqraadiyadda aan xisbiga dhexdiisa ka jirin iyo la'aanta barnaamijyo ama hawl-gallo lagu wecyi-gelinayo taageerayaasha xisbiga oo lagu dareensiinayo "waxay tahay xisbinimadu" iyo kuwa lagu sal-balladhinayo xisbiga,

Kaalinta Warbaahinta

Ka-qayb-galayaashu waxay isku raaceen in ay kaalinta Warbaahintu oo ay ka mid yihiin: Jaraa'idka, Tvga iyo raadyowgu tahay in ay qayb-libaax ka qaataan waxbarashada madaniga ah iyo wacyi-gelinta, xil waynina ka saran yahay arrinta waxbarashada madaniga ah. Laakin se waxay isku khilaafeen in ay warbaahinta Somaliland tahay mid dedaalaysa oo u heellan wacyi-gelinta iyo wax-baridda madaniga ah. Qayb ka mid ah ka-qayb-galayaashu waxay aamminsanayeen in ay tahay mid u heellan wacyi-gelinta iyo wax-baridda madaniga ah in tabteedu tahay. Waxaana hadalladooda ka mid ahaa: " *Kaalin wanaagsan ayay ka qataan waxbaridda madaniga ah iyo wacgyi-gelinta dadweynaha, tabartoodu intay doonto ha le'ekaatee, waxay soo tebisaa barnaamjyo xambaarsan waxyaalo ka mid ah waxbarasho madaniya iyo wacyi-gelin iyo macluumaadyo ku saabsan arrimaha siyaasadda, bulshada, dhaqanka iyo dhaqaalaha oo dadku wax ka bartaan qaddar kastaba ha ahaatee."*

Qaybe kale oo ka mid ah ka-qayb-galayaashu waxay qabeen aragti taa ka duwan; waxaanay aamminsanayeen in aanay kaalintooda si fiican u qaadan. *"Arrinkaana waxaa kuu caddaynaya xilligii doorashooyinka ilaa lacag lagu siiyay ma ahayn kuwa diyaar u ah in ay dadweynaha weci-geliyaan oo haddanu nahay bahda warbaahinta wax badan maanu hurin."* Sidaa waxa tidhi gabadh ka socotay bahada warbaahinta.

Waxaa kalo oo ay ku adkaysteen in warbaahinta dalku ahayn mid ka shaqaysa "waxbarashada madaniga ah" oo ah sidii loo heli lahaa ama loo abuuri laha muwaadin leh xil-gudasho madaniya "civil responsibility".. Waxayna ku eedeeyeen warbaahinta in ay tahay mid faafisa ama abuurta mafaahiim toos uga soo hor jeedda waxbarashada madaniga ah oo ay iyadu xididdada u aastay; waxayna Tusaale u soo qaateen qar ka mid ah dadka aragtidaa qabaa:

"*Magaalooyinka waxa la doonayaa in laga abuuro abtirsiin la yiraado reer Hargaysa, reer Berbera ama reer Burco oo tii qabiilka beddesha, waana dhuuxa wax-barashada madanig ah oo marka qofku cidda uu ka-sii yahayna ay noqoto waxaan ahay macallin, gacansade, shaqaale dawladeed, taas ayay warbaahintu waxay u beddeshay 'Beesha Bariga Burco, Beesha Waqooyiga Hargaysa waana ereyo-bixin iyadu ay abuurtay oo xididdada ay u mudday."*

Waxa kale oo warbaahinta lagu cambaareeyaa in ay tahay mid dadka caammada ah dabagasho halkii ay iyadu noqon lahayd mid caammada hoggaamisa oo hagta isla-markaana soo xigan lahayd dadka wax-garadka ah iyo dadka xil-kaska ah marka ay falanqaynayaan arrimaha qaarkood halka ay ka soo xiganayso caammada iyo af-miisharradda. *"fal nin ama shaksi gaystay ayay warbaahintu dusha ka saartaa qabiilkiisi oo dhan oo ay odhanaysaa reer hebel baa gaystay halkii ay dadweynaha ugu muujin lahayd in fal shaksi la yimaaddo aan loo aanayn reerkiisa."* Sidaa waxa yidhi mid ka mid ah ka-qayb-galayaasha.

Waxa kaloo lays la gartay in dhaliilaha loo soo jeediyey warbaahinta aanay ku koobnayn warbaahinta keliya ee ay la wadaagaan qaybaha kale ee bulshadda Somaliland oo ay isku durufuha iyo isku waayaha yihiin waxayna ka turjumaysaa qaab-dhismeedka bulshadeenna, siyaasada iyo hannaanka dhaqan-dhaqaale ee dalka ka jira.

Caqabadaha hor taagan wax-qabadka warbaahinta ee ay tilmameen ka-qayb-galayaashu waxay inta badani isugu soo biyo shubanaysey afartan arrimood:

- **Aqoon la'aan:** Warbaahinta Somaliland oo aqoon u lahayn sida dadka loo wacyi-geliyo ama loo diyaariyo barnaamiyo waxbarasho madaniya ah oo waxaa ku yar tababarka noocaasa. Taasuna waxay keentay in ay u badato xagga wararka oo ay yaraatay ama aanay jrirn wax ku saabsan wacyi-gelin,
- **Dhaqaale-xumo:** Dakhliga oo aad u yar, waxa jiraa dhaqaale samayn oo waxay raadiyaan wixii ka iibsamaya, taas ayaa xaddidday samaynta barnaamijo wax-barasho madaniya ah iyo in ay ku koobnaadaan magaalooyinka oo anay miyi gaarin iyagoon u raacin wufuud,
- **Qalab, Agab iyo kaabayaasha** fafiinta oo iska yar: Warbaahintu maha mid ballaadhan oo baahsan oo waddanka oo dhan gaadha, idaacadda oo ugu muhiimsan waddanka iyo dadka intay gaarto baa iska yar. Waxaa inta si dheer oo la tilmaamey maqnaasha idaacado gaar ah oo dabooli lahaa baahin ka jirta xagga idaacadda.
- **Caddadis joogto ah:** Warbaahintu sideedaba uma madax bannana, mid dawladeed iyo mid gaarba, waxaana jiraa cadaadis suxufiyiinta kaaga yimaadda dhinaca tafatirayaasha/maamuka oo faaf-reeba wixii aanay raalli ka ahayn. Waxa kalo jira xadhig, hanjabaad iyo cago-juglayn ka timaadda dhinaca dawladda. Waxa intaa u raaca eedayn iyo dhaleecayn kaga timaadda beelaha. Arrimahaas oo odhan waxay keentay in ay suxufiiyuunta arrimaha qaarkood ka fogaadaan.

Kaalinta Ururrada Bulshada Rayidka ah:

Intaan laga doodin kaalinta Ururrada Bulshada Rayidka ah ee ku beegan wax-barashada madaniga ah, qayb ka mid ah ka-qayb-galayaashu waxay ku eedeeyeen in Ururrada Bulshada Rayidka ahi ay yihiin kuwo ay adeegsadaan shisheeyuhu sidii ay wiiqi lahaayeen hay'adaha dawladda ummaddana u jaho-wareerin lahaayeen. Waxayna intaa raaciyeen in ay *"laba ama saddex u shaqaynayaan sidii laga rabay, waxayna u badan yihiin kuwa gudbiya wixii lagu soo shubtay."*

Qayb kale waxay lahaayeen baahida Ururrada Bulshada Rayidka ah waa mid jirta oo dimuraadiyadda aynu qaadannay bay ku salaysan tahay waxaanse weli inoo caddayn oo weli doodi ka taagan tahay kaalinta ay leeyihiin iyo waxa laga filayo. Waxaa kalo jiray kuwa aragtidan qabay:*"Ururradu hadday qalad galeen macneedu ma aha looma baahna, bulshaddeenna ballaadan ee qaybaha kala duwan ah waxaa looga baahan yahay in ay ka-qayb qaataan horumarka dalka oo ay inoo qabtaan dano badan oo yaan la durin fikradda in aynu yeelano ururro bulsho. Waa la dhaliili karaa oo la canaan karaa lana toosin karaa haddii ay wax ka qaldamaan."*

Ka-qayb-galaashu way kula qaybsameen wax-qabadka Ururrada Bulsahda dhinaca waxbarashada madaniga ah. Koox ka mid ah ka-qayb-galayaashu waxay aamminsanayeen in marka laga reebo dawladda, waddanka wixii waxbarid ah iyo wecyi-gelinba in ay qabtaan Ururrada Bulshada. Waxaanay tusaale u soo qaateen xilligii doorashooyinka oo ay jirtay urrurro ka hawl-galay sidii cod-bixiyaasha loo weacyi-gelin lahaa ama wax loo bari lahaa. Xilliyada aanay doorashooyinku jirin qayb ka mid ah Ururrada Bulshadu waxay qaban-qaabiyaan kulammo iyo doodda looga gol leeyahay wacyi-gelin siyaaseed sida kuwa ay qabato Akaadamiyadu. Waxa kale oo soo qaadeen in ay dadka ka wacyi-geliyaan cudurka HIV/AIDS, gudniinka fircooni ah iyo arrimo la xidhiidh xuquuqal insaanka.

Inta badani waxay la ahayd in wax-barashada madaniga ah iyo weyci-gelinta ay ururrada qabtaan in aanay ahayn mid baahsan oo joogta ah, oo sidii looga baahnaa uma gutaan. "*Waxaa jiraa waxay ku koobnaayeen xillgii doorashooyink. Ma jiraan barnaamijyo joogtaha oo socda muda dheer sidii looga miro dhalin lahaa."* Waxayna inta raaciyeen in ay ku kooban yihiin magaalooyinka oo aanay gaarin reer miyiga oo dad farra badani u noolyahay.

Caqabada ugu horayaa oo hortaal wax-qabad ururrada bulsha oo ay xuseen ka-qayb-galayaasha waxay ahayd daacad la'aan. Waxay ku eedeeyeen in ay xil-iska saarin bulshadda ay ka soo dhex-baxday ama bulshadda ay ku dhex jirto daacadna aanay u ahayn ujeedooyinka iyo haddafka ay leeyihiin. Taasuna ay keentay in ay ururradu wax badan oo muhiima oo ay ku jirto danta dalku sidaa wax-barashada madanig ah ay ka muuqan.

Waxa kaloo ay tilmaameen ka-qayb-galayaashu in dadku ururrada bulshada ka mid ahi u bahaan yihiin naftoodu wax-barashadi madaniga ah intaanay dadweynaha ku fidin wax-barasho madani ah. "*Waa in la sheegaa meesha ay wax ka xun yihiin. Halkii ay dadka waxa wanaagsan ku hagi lahayd, iyagaaba u horseeda, maxay dadka baraan iyagaa ayaa u baahan wecyi-gelin iyo waxbarashado madaniya. Haweenay ka mid ahayd kuwii aanu u dirnay wecyi-gelinta cod-bixiyaasha doorashada ka hor, ayaa la soo baxday caagad ay ugu jirtey wax lays kaga masaxo khadka, markaasaan ku idhi maxaa laga filayaa dadka kale haddii adagii shalay faraayey in aannay laba goor codeeyaan aad sidaa samayso.*"

Arrimaha kale ee ay soo qaadeen ka-qayb-galayaashu waxaa ka mid ahaa:

- In ay Ururrada bulshadu dabo-joogaan meelaha lacagtu ku jirto oo ay deeq-bixiyayaashu lacagta ku bixinayaan, taasuna waxay wiiqday wax-qabadkooda ku aaddan waxbarida madaniga ah

- Ururrada Bulshada intooda badani ma fahamsana kaalinta kaga beegan wax-barashada madaniga ah, mana dareensana baahida loo qabo arrinkaas,
- Kuwa wax fahamsanina waxaanay lahayn awooddi iyo dhaqaalihii ay ku hirgelin lahaayeen barnaamij wax-barashado oo baahsan oo joogto ah, sababtoo ah deeq-bixiyayaashu lacag kuma bixiyaan barnaamiyo muddo dheer soconaya,

Kaalinta Dadweynaha

Kaalinta dadweynaha waxay tahay in ay xil iska saaraan sidi ay kor ugu gaadi lahaayeen wacyigooda iyo sidii ay u baran lahayn waajibaakiisa iyo xuquuqdiisa dastuuriga ah isla markaana ay ku dhaqmaan, xuquuqohoodana ku raadsan karaan.

Dhammaan ka-qayb-galayaashu waxay isku raaceen in aanay dadweynaha Somaliland ahayn kuwa leh ama xil iska saara wax-barashada madaniga ah. Waxayna ka muuqaata hab-dhaqanka dadwaynaheenna oo hadday yihiin dadka garanaya wajibaadkooda iyo xuquuqdooda wax yaalo badanna ay sameeyan kuma ay kaceen. "*Wacyiga madaxoooda ka guuxaya waa wax-burburin, waa la cunayaye cun, ninka aan sidaa samayna waxaa loo yaqaan doqon, oo qayrkiiba intaasay ka samaysteen isaga iyo carruurtiisiba way bakhtiyayaan",* sidaa waxa yidhi mid ka mid ah ka-qayb-galayaasha.

Sababo fara badan ayay ka-qayb-galayaashu arrinkaas u aaneeyeen la'aanta dhaq-dhaqaaq ama hoggaan siyaasi ah ama mid aragti leh, waxayna lahaayeen waxaan jirin hoggaan siyaasi ama hoggaan aragti leh: "*hoggaanka siyaasasadeed ee maanta jira waa mid ka shidaal qaata dhaqankaa hore ee aynu tilaamaanay, aragti cusub, qiyam cusub, hab-dhaqan cusub lama yimaaddo oo dadka ku hoggaamiyo, xitaa haddi afka wax laga yidhaahdo oo lagu khudbadeeyo maha mid ay ku dhaqmaan. Markaa hadaynay dadki arkayn aragti cusub oo lagu baaqayo, sidaas ayay dadka uga maqan tahay wecyi-gelinna aynu ka hadlayno."*

Sababta kale ay tilmaameen ka-qayb-galayaashu waxay noqotay qabyaaladda oo ah tan uu yaqaan oo lagu barbaariyey dadka into badan taasuna way ka soo hor jeeddaa wacyiga waxbarashada madaniga ah ee aynu ka hadlayno. Isla markaana waxay keentay in aanay dadweynuhu inta badani dareensanayn ama rumaysnayn in ay ka maqan tahay weycyi-gelinta iyo waxbarashada madaniga ah ee aynu ka hadlayno, sidaa awgeedna aanay diyaarna u ahayn in ay wax qaataan oo ay arrinkaasna dhayalsadaan.

Qaar kale waxay lahayeen jiritaanka agoon yari, iiman la'aan iyo saboolnimo baahsan ayaa kalifay in ay dadka into badni si kastaba wax ku raadsho, oo haddii meel loo tartamayo, dadweynuhu wuxuu dirsada oo doorbidaya kan reerkooda ugu bahalsan oo ay islee yihiin reerka waxbuu u soo dhicinaya. Waxaanna ka dhaadhacsan in kan wanaagsan lagu ag bakhtiyeen, oo aanu reerka wax u soo hooynayn.
Waxaa kaloo la sheegay in ay qaybta dadweynaha wax fahamsan ama diyaarka u ah in ay bartaan wax-barashada madaniga ah in aanay jrin wax-yaalihi assasiga ah ee laga heli wecyi-gelin iyo wax-barashada madaniga ah. Haddu arday yahay ma helayo wax-barasha madanig ah oo cilmiyeesan oo ka bilaabata dusgiga hoose ilaa heer jamaacadeed. Ma jiraan barnaamijyo iyo goobo lagu tallagalay wax-barasho madaniga ah oo ay dadka caadi ah oo danaynaya arrinka ay ka heli karaan.

Waxaa la sheegay in duruufaha dhaqaale ee ka jira wadanka ay keentay in ay dadku ku mashquulaan sidii ay u heli lahaayeen noolal maalmeedkood oo aanay mudnaante siinayn wax-barashada madaniga ah.

Arrimaha mudnaanta leh oo ay tahay in Waxbarashada madaniga ah diiradda lagu saaro:

Ugu dambaystii waxaa laga dooday arrimaha mudnaanta leh oo caqabad ku ah geeddi-socodka dimuqraadiyadda Somaliland oo ay tahay in ay Barnaamijyada ama hawl-gallada Waxbarashada madaniga ah (Civic Education) diiradda lagu saaraa ama lagu daweeyo. Ka-qay-galayaashu waxay soo jeediyeen arrimo badan oo ay leeyihiin waa in waxbarashada madaniga iyo wecyi-gelin lagu wajahaa. Arrimaha inta badani isku raacday waxaa ka mid ahaa:

1. Sixitaanka iyo toosinta madaxda iyo hoggaanka kala duwan ee dalka: Waxbarasha kasto oo madaniya oo lagu dhigo guryahaa, dugsiyada, masaajiidyada ama laga baahiyo warbaahinta oo aanu hoggaanka dalku aan u dhaqmeen oo aanu isagu ahayn tuusaalaha ugu fiican oo lagu dayanayo aanu ahayn oo ku dhaqmayo mid kale, waxaasoo dhan waxay noqonayaan biyo col dhaanshay. Markaa waxaa loo baahan yahay kuwa lagu saxayo oo lagu toosinayo hoggaanka iyo madaxda dalka marka hore,
2. Ka-hor-tagga qabyaaladda sida xun loo adeegsanayo: Dadka intooda badani waxay daacad u yihiin oo hoggaaminayaa qabyaaladda, sidaa awgeed way yar yihin inta waddanka iyo danta guud u daacad ah,
3. Helitaanka bulsho u bisil oo ku dhaqanta hannaanka dimuqraadiyadda: dadweyneheennu maha mid u bisil oo fahamsan waajibaakiisa iyo xuquuqdiisa distooriga ah, isla markaana ma aha mid ku dhaqma oo raadsada xuquqdiisa,
4. Kor-u-qaadista wecyiga cod-bixiyaasha xilliyadda doorashoyinka: xilliyaddi doorashooyinka waxaa soo if baxday in aanay cod-bixiyayaashu ahayn kuwa la socdo oo garanayey hab-u-socodka doorashooyinka.

Habka ama qaabka loo gudbiyo hawl-galadaas

1. Da' yarta waa in loogu daraa manhajka (si-cilmiysan) laga bilaabo dugsiga hoose ilaa heer jaamacadeed,
2. Dadweynaha caadiga ah: waxay tahay in la diyaariyo casharro gaaggaaban oo taxane ah lana adeegsado warbaahinta iyo xarumo ku dhex yaal xaafadaha. Reer miyigana waa in loo sameeyaa koox wareega,
3. Waxaa kale oo la soo jeediyey in la sameeyo "Komishanka Wax-barashada Madaniga ee Qaranka" oo ka kooban qaybaha kala duwan ee kala aha; Dawladda, komishanka dorashooyinka, Axsaabta siyaasiga ah, warbaahinta, ururrada bulshada iyo dadwenha.

Lifaaqa 1

Mowduuca Doodda

Somaliland waxaa ka qabsoomay afar cod-bixinood laga bilaabo tii aftidda distoorka ilaa iyo Golaha Wakiillada oo lagu hirgelinayo habka Dimuqradiyadda Axsaabta faraha badan. Markaa si ay dimuqraadiyadda curdinka ahi u taabbo-gasho waxa lagama- marmaan ah jiritaanka dhaqan siyaasadeed (political culture) oo la jaan-qaadi kara dimuqraadiyadda aynu qaadannay. Siyaabaha Dimuqraadiyadaha cusub ay ku hannan karaan waa dhaqanka siyaasadeed (political culture) oo suurto-gelin kara dimuqraadiyadda wax-ku-ool ah, taas oo ay ka mid tahay waxbarashada madaniga ahi (Civic education).

Somaliland xilliga doorashooyinka ma aha e' ma jirto (civic education) waxbarasho madaniya oo joogto ah oo baahsani.

Markaa is-weydiintu waxay tahay:

1. **Waxaa maxay sababaha keenay in aanay jirin waxbarasdho madani ah (civic Eduation) oo joogtaysan oo baahsani?**
2. **Yaa ay tahay in ay arrinkaas kaalinta koowaad ka qaataan?**
3. **Wa maxay awoodaha ama fursadaha jira ee dhiirri-gelin kara hirgelinta waxbarashadan madaniga ahi (Civic Education),**

Kaalinta Dawladda:

Kaalinta dawladda (heer Qaran iyo heer Hooseba) hadday yihiin fulinta ama sharci dejinta waxay tahay in ay la yimaaddaan tallaabooyin looga gol-leeyahay wax-barida dadaweynaha sidi loo xoogin laha ku-dhaqanka dimuqraadiyadda isku-xidhka Dawladda iyo Muwaaddinka iyo xoojinta dareenkooda waddaninnmo.

Markaa is-weydiintu waxay tahay:

1. **Waa maxay tallaabooyinka ama hawl-gallada kala gudboon qaybaha kala duwan ee dawladda arrinka waxbarashada madaniga ah,**
2. **Ma jiraan hawl-gallada aad tilmaanteen? Ama kuwo hadda gacanta lagu hayaa?**

3. **Haddaanay jirin, maxaa sababay?**
4. **Waa maxay kaalinta ay kala leeyihiin:**
    a. **Dawladda dhexe: yaana u xil-saaran?**
    b. **Sharci-dejinta: yaa ku xil-saaran?**
    c. **Dawaladaha Hoose: yaa ku xil-saaran?**
5. **Waa maxay arrimaha ay tahay in ay ku jiraan ama ka muuqdaan tallabooyinkaas?**

Kaalinta Komishanka Doorashooyinka:

In kastoo xilka ugu weyn Komishanka Doorashooyinka uu yahay maareynta iyo agaasimida doorashooyinka, haddana waxyaabaha kale ee muhiimka ah ee xilalkooda ka mid ahi waa wax-baridda iyo waci-gelinta dadwaynaha. Xilliyadii doorashooyinka, Komishanka Qaranku waxay sameeyeen hawl-gallo kooban oo lagu wacyi-gelinayey cod-bixiyayaasha, laakiinse ma jirin mid joogto ah oo baahsani.

Markaa is-waydiintu waxay tahay:

1. **Wacyi-gelinta/waxbaridda dadweynaha si joogta ah ma ka mid tahay waxyaabaha loo igmaday?**
2. **Hadday jawaabtu tahay haa, waa maxay duruufaha u saamixi waayey Komishanka in sameeyaan wayci-gelin joogta ah oo ballaadhan?**
3. **Ka talo-bixi sidii Komishanku uu hawsha u gudan lahaa?**

Kaalinta Axsaabta:

Axsaabta siyaasiga ah waxay door wayn ku leeyihiin kobcinta hannaanka dimuiqraadiyadda. Hawlaha ugu muhiimsan ee xisbiyadu waxa ka mid ah abaabulka iyo mideynta dadka is-ku afkaarta siyaasiga ah iyo adkeynta xidhiidhinta muwaaddiniinta iyo madaxda la doorto. Taasina waxay ku iman kartaa helitaanka dadweyne u bisil ka qayb-galka hannaanka axsaabta badan.

Markaa is-weydiintu waxay tahay:

1. **Waa maxay tallaabooyinka ama hawl-gallada kala gudboon Axsaabta arrinka weci-gelinta iyo waxbarida dadweynaha?**
6. **Ma jiraan hawl-gallada aad tilmaanteen? Ama kuwo hadda gacanta lagu hayaa?**
7. **Hadaanay jirin, maxaa sababay?**

8. **Waa maxay arrimaha ay tahay in ay ku jiraan ama ka muuqdaan tallabooyinkaas?**

Kaalinta Warbaahinta:

Warbaahintu oo ay ka mid yihiin: Jaraa'idka, Tvga, raadyowga, waxay tahay in ay indhaha ku hayaan hab-socodka hannaanka dimuqraadiyadda, qayb-libaaxna ka qaataan wacyi-gelinta iyo la socodsiinta dadweynaha arrimaha ka jira waddanka.

Marka is-waydiintu waxay tahay:

1. **Warbaahinta Somaliland ma tahay mid u heellan wacyi-gelinta dadweynaha?**
2. **Haddaanay jirin, maxa sababay?**
3. **Mustaqbalka maxay ka damacsan yihiin arrintaas?**

Kaalinta Ururrada Bulshada Rayidka ah:

Ururrada bulshada rayidka ahi waxay tahay in ay door weyn ka qaataan kor-u-qaadista ka-qayb-galka dadweynaha ee hannaanka dimuqraadiyadda iyo talada dalka. Samaynta wacyi-gelin iyo waxbarid dadweyne oo joogto ah oo baahsan ayaa ka mid siyaabaha ay ururradaasi kor ugu qaadi karaan ka-qayb-galka muwaaddiniinta talada waddanka.

Markaa is-weydiintu waxay tahay:

4. **Ururrada Bulshada Rayidka ah ee Somaliland ma yhiin kuwo u heellan wacyi-gelinta iyo waxbaridda dadweynaha?**
5. **Hadaanay jirin, maxa sababay?**
6. **Mustaqbalka maxay ka damacsan yihiin arrintaas?**

Kaalinta Dadweynaha:

Taabbo-galka dimuqraadiyadda Somaliland in badan waxay ku xidhnaanaysaa helitaanka ama jiritaanka dadweyne bisil oo fahamsan waajibaakiisa iyo xuquuqdiisa dastuuriga ah isla markaana ku dhaqma, xuquqqdiisana raadsan kara.

Markaa is-waydiintu waxay tahay:

7. **Dadweynaha Somaliland ma yihiin kuwo xil iska saara sidi ay kor ugu gaadi lahaayeen wacyigooda?**
8. **Hadaanay jirin, maxa sababay?**
9. **Sidee baa lagu dhiirri-gelin karaa arrinkaas?**

Mudnaanta kowaad:

Barnaamijyada ama hawl-gallada Waxbarashada madaniga ah (Civic Education) waxay ku habboon yihiin in ay ku salaysan yihiin arrimaha mudnaanta mudun oo caqabad ku ah geeddi-socodka dimuqraadiyadda ee Somaliland.

Markaa is-waydiintu waxay tahay:

1. **Waa maxay arrimaha mudnaanta leh oo caqabad ku ah geeddi-socodka dimuqraadiyadda Somaliland oo ay tahay in uu Barnaamijyada ama hawl-gallada Waxbarashada madaniga ah (Civic Education) diiradda lagu saaraa?**
2. **Soo jeedi hababka u fiican ee arrinkaas loogu soo bandhigi lahaa Waxbarashada madaniga ah (civic education),**

Lifaaqa 2

Agendaha Aqoon-is-waydaarsiga

Salaasa 4/09/07 **Maalinta Kowaad: Agendaha**

Wakhtiga	**Mowduuca**
8:00-9:00	• Diiwaan-gelinta ka-qayb-galayaasha • Furitaan • Isbarashada ka qayb-galayaasha • Hab-dhaqanka kulanka • Ujoodooyinka aqoon-is-waydaarsiga
9:00-10:00	**Dood Guud ku saabsan** • Wax-barashada Madaniga ah ee Somaliland • Caqabadaha kortaagan
10:00-10:30	BREAK
10:30-10:50	**Lasocoto Doodii Guud** • Awoodaha iyo fursadaha jira
10:50-12:15	**Kaalinta Dawladda (fulinta iyo sharci dejinta)** • Waa maxay kaalinta dawladda • Caqabadaha jira • Sidii loo xoojin lahaa kaalinta dawladda
12:15	Dhamaad

Arbaco 5/09/07 **Maalinta Labaad: Agendaha**

Wakhtiga	**Mowduuca**
8:00-9:20	**Kaalinta Komishanka Qaranka** • Waa maxay kaalinta Komishanka • Caqabadaha jira • Sidii loo xoojin lahaa kaalinta Komishanka
9:20-10:30	**Kaalinta Axsaabta** • Waa maxay kaalinta Axsaabta • Caqabadaha jira • Sidii loo xoojin lahaa kaalinta Axsaabta
10:30-11:00	BREAK
11:00:12:15	**Kaalinta warbaahinta** • Waa maxay kaalinta warbaahinta • Caqabadaha jira • Sidii loo xoojin lahaa kaalinta warbaahinta
12:15	Dhamaad

Khamiis 6/09/07 **Maalinta Saddexaad: Agendaha**

Waqtiga	**Mowduuca**
8:00-9:20	**Kaalinta Ururrada Bulshada Rayidka ah** • Waa maxay kaalinta Ururrada Bulshada Rayidka ah • Caqabadaha jira • Sidii loo xoojin lahaa kaalinta Ururrada Bulshada Rayidka ah
9:20-10:30	**Kaalinta Dadweynaha** • Waa maxay kaalinta Dadweynaha • Caqabadaha jira • Sidii loo xoojin lahaa kaalinta Dadweynaha
10:30-11:00	BREAK
11:00:12:15	**Mudnaanta Kowaad:** • Barnaamijyadda wax-barashada madaniga ah ee ku haboon Somaliland • Hababka u fiican ee barnaamijyadda loogu soo bandhigi lahaa waxbarashada madanig ah
12:15	Dhamaad

Lifaaq 3

	Name	Organization
1	Abdi adowaa	DG of M. of Education
2	Mohamed Yusuf	NEC
3	Mohamed Ismail Salah	HEDO
4	Yusuf Mohamed Guleed	Local Canceller
5	Ismail Abdi Geli	Local Canceller
6	A/ shakur abdi adan	YMD
7	Mohamed Dahir Ilmi	W.W.B
8	Hussein Dahir	M. of Education
9	Ali Mohamed No	Udub- Party
10	Hamda Hussein Ahmed	Working group
11	Farah Yasiin A/ llahi	Working group
12	Ahmed Mohamed	Geeska Africa
13	Ayan Muse	Havoyoco
14	Hamze Mohamed Hassan	SRC
15	Yusuf A/ rahman Aw Yusuf	SRC
16	Amran Hassan A/ llahi	UOH
17	Sahra Kiin a/ rahman	UOH
18	Faisal A/ llahi Abdalle	Maangeeq MG
19	Ahmed Ismail Hussein	HCTv
20	Barkhad Mahamuod Kaariye	Ogaal News Paper
21	Mahamuod Abdi A/ llahi	Somali Rights Watch
22	A/ qadir Ahmed Mohamed	UOH
23	A/ llahi Yasiin Deriye	M. of Education
24	Adnan Abdi Hassan	Sonyo Youth Umbrella
25	Ahmed Mohamed Hassan	Activist
26	Rashiid Sheikh A/ llahi	WCC
27	A/ Fattah Mohamed Aideid	
28	Hamze A/ rahman H. Yusuf	Admas
29	A/ rahman Ismail omar	CCBRS
30	Hodan Yasiin Ibrahim	TOSTAN/ SOCSA
31	Qani Abdi Ali	SOCSA
32	A/ hakiim Mahamuod Shirwa	YMD
33	A/ kariim Yusuf Dahir	IHU
34	A/ qadir Ahmed Ismail	APD
35	A/ qani H. Ali Yusuf	SRC
36	Badra Ismail Kahin	Kulmiye
37	Aamina Mohamed Deriye	Kulmiye
38	A/ qani H. Ali Yusuf	SRC
39	Mohamed Hussein Ahmed	Dadweinaha
40	Hussein Dahir Roble	M. of Education
41	Adan Mohamed Mire	UCID- Party

42	Ahmed-deeq A/ llahi	SITCO
43	Mohamed Mahamuod Dahir	YMD
44	Barre Nooh H. A/ llahi	UDUB